## ARJIGA BARNAAMIJYADA TAMARTA MINNESOTA EE 2021-2022 DA

Arjiga Barnaamijyada Tamarta ee Minnesota waxaa lagu heli karaa Isbaanish ama daabacad waaweyn oo ka socoto Adeeg -bixiyahaga ama khadka tooska ah ee http://mn.gov/commerce/consumers/consumer-assistance/energy-assistance/

**Arjigan waxaa loo isticmaalaa in lagu codsado barnaamijyadan**

- Barnaamijka kaalmada Tamarta (EAP)
- Barnaamijka kaalmada Cimilada (WAP)
- Barnaamijka Horumarinta Daryeelka (CIP)

**Sida loo buuxiyo arjigan**

- Akhri dhammaan macluumaadka ku xusan arjigan.
- Buuxi dhammaan macluumaadka qof kasta oo ku nool gurigaaga. DHAMMAAN dadka ku nool gurigu waxay xubno qoyska ka tirsan yihiin haddii ay kula wadaagaan jikada ama meelaha kale ee lagu noolada ee guriga.
- Dhammaystir oo u soo gudbi arjiga, caddaynta dakhliga, iyo dukumiintiyada kale ee Adeeg Bixiyahaga.
- Waa waajib in aanu haysannaa arjiga oo dhammaystiran si aan u go'aamino haddii aad u qalanto taageero.

If you need help filling out this application, call your local EAP Service Provider. Their telephone number is listed on the first page of the Minnesota Energy Programs Application.

Si necesita ayuda para completar esta solicitud, comuníquese con su proveedor de servicio del PAE local. El número de teléfono se encuentra en la primera hoja de la solicitud de los Programas de Energía de Minnesota.

Haddii aad uga baahan tahay caawin buuxinta codsigan, wax Bixiyahaaga Adeega EAP ee maxaliga ah. Lambarka taleefankooda wuxuu ku qoran yahay bogga koowaad ee Codsiga Barnaamijyada Tamarta ee Minnesota.

Yog koj xav tau kev pab sau daim ntawv thov no, hu rau Tus Neeg Muab Kev Pab EAP hauv koj cheeb tsam. Lawv tus xov tooj yog teev rau ntawm thawj nplooj ntawv ntawm Daim Ntawv Thov Minnesota Cov Khoo Kas Pab Them Nqi Hluav Taws Xob.

Nếu quý vị cần hỗ trợ để điền vào đơn đăng ký này, hãy gọi cho Nhà Cung Cấp Dịch Vụ EAP tại địa phương của quý vị. Số điện thoại của các nhà cung cấp được liệt kê trên trang đầu tiên của Đơn Đăng Ký Chương Trình Năng Lượng Minnesota.

**So dir caddaynta dakhliga**

- Soo dir caddaynta dhammaan dakhliga guud ee ay heleen dhammaan dadka qoyskaaga ka tirsan 3 dii bilood ee ugu dambayse ee ka hor bishii aad saxiixday arjigaga. Soo dir nuqullo, kuwa asalka ah lama soo celin doono.

| Arjiga la saxiixay: | Soo dir caddaynta dakhliga guud ee soo galay: | Dakhliga qoyska kama badnaan karo tilmaamahan dakhliga ee muddada 3 da bilood ah: | |
|---|---|---|---|
| Ogosto 2021 | May, juun, Luulyo 2021 | **Xajmiga Qoyska** | **Dakhliga** |
| Sebtembar 2021 | Juun, Luulyo, Ogo 2021 | **1** | $8,809 |
| Oktoobar 2021 | Luulyo, Ogo, Sabt 2021 | **2** | $11,520 |
| Nofeembar 2021 | Ogo, Sabt, Okt 2021 | **3** | $14,230 |
| Diisambar 2021 | Sabt, Okt, Nof 2021 | **4** | $16,941 |
| Janaayo 2022 | Okt, Nof, Diic 2021 | **5** | $19,651 |
| Febraayo 2022 | Nof, Diis 2021, Jan 2022 | **6** | $22,362 |
| Maarso 2022 | Diis 2021, Jan, Feb 2022 | **7** | $22,870 |
| Abriil 2022 | Jan, Feb, Maarso, 2022 | **8** | $23,378 |
| May 2022 | Feb, Maarso, Abriil 2022 | **9** | $23,887 |

**Maxay tahay caddaynta la soo diri**

- **Mushaharka:** EAP waxay isticmaali kartaan SSN -kaaga si loo xaqiijiyo mushaharka uu soo gudbiyay loo -shaqeeyahaagu. Waxaa laga yaabaa inaan ku weydiinno inaad keento cadaynta jeegagga ama xaqiijin kale haddii aan awoodi wayno inaan xaqiijinno mushaharkaaga.
- **MFIP, GA, DWP:** Bayaanka gobolka oo muujinaya qaddarka bil kasta ama bayaannada bangiga.

- **Taageerada Lamaanaha ama Masruufka:** Firi nuqullada, bayaannada bangiga, ama qoraalka uu saxeexay bixiyaha oo sheegaya cadadka lacag bixinta iyo taariikhaha, ama caddayn kale oo cadadka la helay ah.
- **Faa'iidooyinka Halgamaanimo, amniga bulshada, RSDI iyo SSI:** Waraaqaha abaalmarinta, bayaannada bangiga oo muujinaya dhigasho toos ah, ama nuqullada jeega.
- **Magdhawga Shaqaalaha, Naafanimada Muddada Gaaban iyo Muddada Dheer**: Ogeysiiska abaalmarinta faa'iidada, nuqulada magdhawga shaqaalaha ama jeegaga naafada, diiwaannada magdhawga shaqaalaha, ama diiwaanka qareenka.
- **Magdhawga Shaqo La'aanta:** EAP ayaa kuu xaqiijin kara dakhligan adiga.
- **Iskii u shaqeyste, Beer, iyo Dakhliga Kirada:** 2-da bog ee ugu horreeya ee canshuur-celintaadii ugu dambeysay ee IRS-1040 iyo Jadwalka 1. Haddii aadan xareyn canshuuraha, wac Adeeg-bixiyahaaga oo weydii Foomka Iskaa-u-shaqeysiga.
- **Xiisaha, Saami -qeybsiga:** Bayaannada bangiga, IRS-1099, ama IRS-1040.
- **Dakhliga Hawlgabka oo ay ku jirto dakhliga IRA:** Jeegaga mushqaayadaha/jirridaha, bayaannada bangiga ama warqadda abaalmarinta.
- **Hawlgabka iyo lacagta Sannadlaha:** Jeegaga mushqaayadaha /jirridaha, bayaannada bangiga ama warqadda abaalmarinta.
- **Dakhliga Qabiilka Qof Kasta, gunooyinka, ama Lacag-bixinada Xukunka:** Jeegaga mushqaayadaha /jirridaha, bayaannada bangiga ama warqadda abaalmarinta.
- **Dakhli Majiro:** Haddii qoyskaagu uusan lahayn dakhli oo uusan jirin qof iskiis u shaqeysta, wac Adeeg bixiyahaaga.

**** Fadlan soo dir nuqullada caddaynta ee dakhligaaga. Kuwa Asalka ah lama soo celin doono ****

---

**Maxaa xiga oo dhacay?**

- Bixiyaha Adeegga ee degaankaaga ayaa dib u eegi doona arjigaaga oo kula soo xiriiri doona haddii ay u baahan yihiin macluumaad dheeri ah.
- Haddii ay haystaan dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka ah, Adeeg -bixiyahaagu wuxuu sida ugu dhaqsaha badan u habayn doonaa arjiga, waxaadna heli doontaa warqad kuu sheegaysa haddii aad caawinaad heli karto.
- Haddii la ansixiyo, waxaan macaashkaaga siin doonaa shirkadaha ku qoran codsigaaga.
- Haddii laguu diido, waxaan kuu sheegi doonaa sababta iyo sida aad dib ugu codsan karto ama aad racfaan uga qaadan karto go'aanka.

---

**Gargaarka degdegga ah ee tamarta**

Barnaamijka Kaalmada Tamarta ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo haddii ay ku haysato xaalad tamareed degdag ah. La xiriir Adeeg Bixiyahaaga haddii::

- Aad haysato biilka tamarta oo la soo dhaafay oo aadan bixin karin
- Kulayliyaahaaga ama korontadaadu ay dansantahay ama waa la xiri doono
- Aad awoodi waysey in aad heshid shidaal keenista
- Aad adigu iska leedahay gurigaaga oo foornaduna ay san shaqaynaynin

---

**lambarada amniga bulshada (SSNs)**

SSN-yada waxaa looga baahan yahay dhammaan codsadayaasha haddii aadan u codsanayn sida qof u-qalma oo aan muwaadin ahayn (tusaale ahaan, degane rasmi ah, magangelyo-doon, qaxooti, iwm.). Haddii aadan la imaanin lambarada amniga bulshada ee saxda ah ama dukumiintiyada socdaalka, ma ansaxin karno arjigaaga. Haddii aad tahay qof aan u-qalmin oo aan muwaadin ahayn, waxa laga yabaa inaad codsan karto SSN la'aan. La xiriir Adeeg Bixiyahaaga si aad u ogaato dukumentiyada loo baahan yahay. Haddii adiga ama qaar ka mid ah xubnaha qoyskaagu ay yihiin dad aan u-qalmin oo aan muwaadiniin ahayn, qoyskaagu weli wuu heli karaa caawimaad haddii xubin qoyska ka mid ah u yahay muwaadin ama muwaadin u-qalmo. Wixii Faahfaahin ah kala xiriir Adeeg bixiyahaaga. Gobolku wuxuu u adeegsan doonaa SSN -yada maamulka EAP si loo firiyo aqoonsiga, looga hortago ka -qaybgalka so noq noqda, oo loona go'aamiyo u -qalmitaanka faa'iidooyinka dadweynaha. SSN -kaaga ayaa sidoo kale loo isticmaali doonaa in lagu helo macluumaadka mushaharka iyo magdhowga shaqo la'aanta Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota (DEED), xaqiijinta macluumaadka aad nagu siisay arjiga, iyo si looga hortago, loo ogaado, oo loona saxo khayaanada, qashinka, iyo xadgudubka.

---

**Codsadayaasha aan Muwaadinka ahayn**

Si aad caawimo uga hesho Barnaamijyada Tamarta ee Minnesota, waa inaad ahaataa muwaadin ama aad Maraykanka ku joogtaa (US) si sharci ah. **Gargaarka Kaalmada Tamarta laguma xisaabiyo go'aaminta kharashka dadweynaha.** Waad codsan kartaa oo aad caawinaad u heli kartaa xubnaha qoyska ee u -qalma, xitaa haddii adiga ama qaar ka mid ah xubnaha qoyska aadan u qalmin sababo la xiriira xaaladda socdaalka dartiis. Xubnaha qoyskaaga ee u qalma dadka aan muwaadiniinta ahayn waa inay muujiyaan caddaynta xaaladdooda socdaalka. Sii nuqulka labada dhinac ee kaararka socdaalka ama dukumiintiyo kale oo tusaya xaaladda socdaalka xubin kasta oo qoyska ka tirsan oo ah muwaadin u qalma. Dhammaan xubnaha qoyska, iyadoon loo eegin xaaladda socdaalka ama heerka dhalashada, waa inay bixiyaan macluumaadka dakhligooda, laakiin kaliya kuwa ah muwaaddiniinta ama kuwa aan muwaadiniinta ahayn ee u qalma ayaa loo tirin doonaa inay yihiin xubnaha qoyska. La xiriir Adeeg Bixiyahaaga si aad u ogaato waxa looga baahan yahay xaaladdaad. **Lama wadaagno macluumaadka adiga kugu saabsan Adeegyada Jinsiyadda iyo Socdaalka Mareykanka (USCIS) oggolaanshahaaga la'aantiis.**

---

**Barnaamijka Kaalmada Cimilada (WAP) Tilmaamaha U -qalmitaanka Dakhliga**

Waxaa laga yaabaa inaad u -qalanto Barnaamijka Kaalmada Cimilada (WAP) xitaa haddii dakhliga qoyskaagu ka sarreeyo xadka EAP. WAP waxay siisaa kor u qaadista tamarta guriga oo lacag la'aan ah mulkiilayaasha iyo kireystayaasha u-qalma si ay gacan uga geystaan badbaadinta tamarta oo ayna uga dhigaan gurigaaga meel lagu noolaado oo caafimaad iyo badbaado leh. Wixii macluumaad ah, booqo https://mn.gov/commerce/consumers/consumer-assistance/weatherization ama wac **1-800-657-3710**

---

**Ilaalinta Xeerka Cimilada Qabowga**

Haddii aad u isticmaasho gaaska dabiiciga ah ama korontada si aad ugu kululayso gurigaaga ama aad u baahan tahay koronto si aad ugu shaqaysiiso kulayliyahaaga ama marawaxadaha foornada, waxaad u qalmi doonta ilaalinta Xeerka Cimilada Qaboobaha inta u dhexeysa Oktoobar 1 ilaa Abriil 30.

- Xeerka Cimilada Qabowga wuxuu kaa caawinayaa inaad ka ilaaliso adeeggaaga jarida ama wuxu kaa caawin kara inaad dib isugu xirto adeeggaaga.
- **Si aad u hesho ilaalinta Xeerka Cimilada Qabowga, WAA INAAD la xiriirto shirkadaha tamartaada oo aad samayso haysatona qorshe lacag -bixineed. Haddii aad seegto lacag -bixin, waxaad waayi doontaa badbaadintaada waxaana waayi doonta kuleylkaaga.**
- Haddii aad hesho Kaalmada Tamarta, waxaad horay ugu qalmi ilaalinta Xeerka Cimilada Qabowga. Barnaamijka Kaalmada Tamarta ma aha qorshe lacag bixineed mana beddeli doono waxa aad u baahan tahay inaad bixiso.
- Adeeg Bixiyahaga ayaa kaa caawin kara inaad la sameyso qorshe lacag -bixineed oo macquul u ah shirkadaha tamartada.

Tri-County Action Program, Inc.
1210 23rd Avenue S
PO Box 683
Waite Park, MN 56387
Phone: (320) 251-1612 or 1-888-765-5597
Fax: (320) 654-9473
Email: general@tricap.org
www.tricap.org

This application must be postmarked or received by May 31, 2022

| **Adeegsiga xafiiska oo kaliya** |
|---|
| **HH:** |
| Gudbinta ☐ |
| Rep#: |
| Lacagta deeqda: |

**Fadlan isticmaal khad madow si aad u buuxiso arjigaaga. dukumentiyada aad soo dirtay Ha u isticmaalin calaamadeyayaal.**

# ARJIGA BARNAAMIJYADA TAMARTA MINNESOTA EE 2021-2022

MN COMMERCE DEPARTMENT

*Kahor inta adan dhammaystirin arjigan, si taxaddar leh u akhri waxa ku lifaaqan "Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga" iyo Tilmaamaha.*

**Qeybta 1 aad. Macluumaadka shaqsiyadeed** - **Xaqijii in dhammaan macluumaadka horay loo daabacay ay sax san yihiin. U geli isbedelada hadba sida loogu baahdo.**

**lambarkaaga amniga bulshada (SSN)**

- Lambarada amniga bulshada (SSN) ayaa looga baahan yahay dhammaan xubnaha qoyska waana la xaqiijin doonaa
- Haddii SSN sax ah la waayo, waxaa loo baahan yahay nooc kale oo dukumentiyo ah
- Haddii xubno ka tirsan qoyska ay yihiin kuwa aan u-qalmin oo aan muwaadiniin ahayn, reerkaagu weli wuu heli karaa kaalmo haddii ugu yaraan 1 qof oo reerka ka mid ah uu yahay muwaadin ama qof aan muwaadin ahayn oo u-qalma
- Waxaan u isticmaalnaa SSN -kaaga si aan u helno macluumaadka mushaharka iyo magdhawga shaqo la'aanta

**magacaaga sharciga ah**:

Magaca Hore ____ M.I. ____ Magaca Dambe ____ Taariikhda Dhalashada ____-____-____ (BS – ML – SSSS)

**Cinwaanka Hadda Halka Aad Ku Nooshahay**

Lambarka Guriga iyo Wadada ____ Apt # ____

Magaalada ____ Gobolka MN summada sibka ____ Degmada ____

**Cinwaanka boostada (haddii uu ka duwan yahay cinwaanka meesha aad ku nooshahay):**

Wadada ama sanduuqa bostada ____

Apt # ____

Magaalada ____ Gobolka ____ summada sibka ____

**Luqadda Hadalka:** ____

**Taleefanka: Koowaad:** (____) ____ ○ Mobilka **Mid kale:** (____) ____ ○ Mobilka

**Cinwaanka Iimaylka:** ____ **Si aad qoraal iigula soo xiriirto, waxaan doorbidaa:** ○ Boostada Maraykanka (warqada) ○ Iimayl

**Wakiilka idman:** Haddii aad buuxiso qaybtan, "Wakiilka idman" aya fasax u haystaa inuu adiga ku matalo.

Magaca hore ____ Magaca Dambe ____ (____) ____ Talefoonka

Haddii aad rabto in Wakiilka Idman uu ku helo iimayl adiga ahaan, cinwaankooda ku dar halkan:

Wadada ama Sanduuqa Boostada ____ Apt # ____ Magaalada ____ Gobolka ____ summada sibka ____

**SALKA HOOSE EE BOGGA UGU DAMBEEYA ARJIGAN WAA INAAD SAXIIXDA OO TAARIIKHDA KU QORTAA**

## Qeybta 2 aad. Macluumaadka Qoyska

**LIIS-GAREE DHAMMAAN XUBNAHA QOYSKA, ADIGA ISKA BILAAW (waalidiinta aan xannaanaynin waxay ku dari karaan carruurtooda yaryar):**

| Lambarka dadbaadada bulshada (LOO BAAHAN YAHAY) | Magaca Sharciga Ka hore K.D. Ka dambe (LOO BAAHAN YAHAY) | Taariikhda Dhalashada (LOO BAAHAN YAHAY) | Dakhli (6 BILOOD EE U DANBAY) | Tirada Loo-shaqeeyayaasha (6 BILOOD EE U DANBAY) | Jinsiga U qor | Jinsiyada | Isbaanish Laatiino/a/x | Naafada | rug caddaa |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 555-55-5555 | Pat T. Smith | mm-dd-yyyy | Y/N | | Dheddig | eeg hoos | Y/N | Y/N | Y/N |
| | | - - | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | |

**Ku lifaaq xaashi gooni ah haddii ay lagama maarmaan u tahay xubnaha qoyska ee dheeriga ah.**

| **Jinsiyada:** | **A** = Aasiyaan **B** = Madow ama Afrikaan Mareykaan **I** = Hindida Mareykanka ama Dhaladka Alaska<br>**P** = Dhalad Hawaiian ah ama Pacific Islander kale **W** = Cadaan **M** = Jinsiyada Badan **O** = Kuwa kale |
|---|---|

Ma jiraa qof ka tirsan qoyskaaga oo hadda ah shaqaale ama xubin ka tirsan wakaaladdan gargaarka tamarta? ○ Haa ○ Maya

Immisa qof ayaa ku nool gurigaaga? ______________ Imisa AYAAN haysan caymiska caafimaadka? ______________

**Miyuu hoos u dhacay dakhliga xubin kamid ah qoyska 3dii bilood ee la soo dhaafay? ○ Haa ○ Maya Hadii ay Haa tahay, qofma……………**

**Dakhliga, Faa'iidooyinka, iyo kaalmooyinka kale:** Calaamadee dhammaan kuwa quseeya qof kasta oo ka tirsan qoyskaaga oo **caddayn soo dir.**

### Dakhliga

- ☐ Mushaharka
- ☐ Iska u-Shaqaysiga */ Dakhliga Beerta *

Taariikhda Ganacsigu bilaabmay: ________/____________

** Dir 2-da bog ee ugu horreeya ee canshuur-celintaadii ugu dambeysay ee IRS-1040 iyo Jadwalka 1*

- ☐ Magdhawga Shaqo La'aanta
- ☐ Dulsaar ama Dakhli Qaybsi
- ☐ Dakhliga Kirada
- ☐ Magdhawga Shaqaalaha
- ☐ Qandaraaska Dulsaarka Sabarlogada

### Faa'iidooyinka

- ☐ Fai'idonyinka Ammaanka Bulshada (SSDI, RSDI, SSA)
- ☐ Dakhliga Ammaanka Dheeraadka ah (SSI)
- ☐ Hawlgabka/Sannadlaha (oo ay ku jiraan saddexdii biloodba mar & sanadkiiba)
- ☐ Dakhliga Hawlgabka (oo ay ku jiraan IRA, iwm.)
- ☐ Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota (MFIP)
- ☐ Gargaarka Guud (GA)
- ☐ Faa'iidooyinka Halyeeyada
- ☐ Lacagaha Qabiilka ee Qof Walba
- ☐ Xukunnada Qabiilka ama Gunnada Qabiilka
- ☐ Naafonimada Wakhtiga-Dheer/wakhtiga gaaban
- ☐ Masruufka ama Taageerada Lamaanaha
- ☐ Shaqo leexsan (DWP)

### Ma jirto caddaynta dakhliga ee loo bahan yahay:

- ☐ Taageerada Ilmaha - Qaddarka bil kasta $____________
- ☐ Taageerada Cuntada
- ☐ Lacagta Canshuurta Dakhliga La kasbaday
- ☐ Dakhli Ma jiro: Fadlan naga soo wac << TELEFOONKA SP>>

### Caawinaad Kale

- ☐ Dakhli kale oo aan la qorin:

**Arjigaaga waa la daahin doonaa haddii aadan soo raacindhammaan caddaynta dakhliga ee loo baahan yahay.**

**Qeybta 3 aad. Macluumaadka Guriyeynta**

| | |
|---|---|
| **Nooca Guriyeynta:**<br>○ guri<br>○ Guryo Dabaq/Sar<br>○ Guri magalo<br>○ Hoyga guurguura<br>○ Sar kala qayb<br>○ sar sedex qayb<br>○ sar afar qayb<br>○ kuwa kale | Miyaad bixisaa kirada ama deynta guriga? ○ Haa ○ Maya Hadii ay tahay **Haa**, lacagta aad bixiso: $ |
| | **Kiraystayaasha:** Ma heshaa kabis kirada mise waxaad ku nooshahay guryo la kabo? ○ Haa ○ Maya<br>Kulaylka ama korontadu ma ku jiraan kiradaada? Sax kuwa ku khuseeya: ☐ Kuleylka ☐ Koronto<br>**Macluumaadka Kireyaha** Magaca:________ Talefoonka (____)<br>Waddada ama Sanduuqa Boosta Apt#________<br>Magaalada________ Gobolka________ Summada sibka |
| Intee in le'eg ayaad ku noolayd gurigaaga hadda? | **Milkiilayaasha guryaha:** Ma leedahay ama ma iibsanaysaa gurigaaga?? ○ Haa ○ Maya<br>Haddii nidaamkaga foornada/kulula ynta **UU SAN** hadda shaqaynayn, sax sanduuqan: ☐<br>Isla markiiba naga soo wac 320-251-1612 haddii nidaamkaga foornada/kululaynta uu san shaqaynayn. |
| ________Sannadood<br>________Bilood | **Isticmaalka Ganacsiga ee guriga:** Haddii aad iskaa u shaqeysato, ganacsiga ma gurigaaga ayu ku yala? ○ Haa ○ Maya<br>Hadii ay Haa, ganacsi nooce eh ama shaqo nooce aya lagu qabtaa gurigaaga ama hantidaada?<br>________<br>Miyaad qof un ka kireyse qayb gurigaaga ka mid ah? ○ Haa ○ Maya |

**Qeybta 4 aad. Bixiyeyaasha Tamarta**

## Shirkadahee bixiya kulaylka, korontada, iyo biyaha* gurigaaga?

Arjigan ku soo dir nuqulka biilashaadii ugu dambeeyay iyo/ama rasiidhkii shidaalka.

*** Caawimaad ayaa la heli karaa haddii aad haysato biilkii biyaha ee hore.**

| | Kuleylka ugu weyn | Kuleylinta Kale | Koronta | Soolarka Beerta | Biyaha |
|---|---|---|---|---|---|
| **Magaca Shirkadda iyo Nooca Shidaalka:** | ○ Gaaska Dabiiciga ah ○ Propane ○ Saliid ○ Biofuel ○ Uumi | ○ Gaaska Dabiiciga ah ○ Propane ○ Saliid ○ Biofuel ○ Uumi | ☐ Kuleyl leh koronto | | |
| **Lambarka Akawnka:** | | | | | |
| **Magaca Akownka ku yala:** | | | | | |

Waxaan u kala qaybin doonaa faaidooyinkaga shirkadda ugu weyn ee kululaynta iyo shirkadda korontada.

**Xulasho ikhtiyaari ah:** Haddii aad rabto in faaidooyinkaga si kala duwan loo bixiyo, Fadlan hoos ku tilmaam:

○ Dhammaan kuleylka ugu weyn ○ Dhammaan korontada ○ kuwa kale:..........

Miyad la wadaagtaa haantaada shidaalka ama mitirka tamarta qoys kale? ○ Haa ○ Maya

**Haddii aad ku kululayso alwaax ama shidaal kale:**

Biofuel aad isticmaasho - ○ Alwaax ○ boonshe ○ sabuul ○ kuwa kale

Waa meeqa kulaylka boqolkiiba tan ay keento?______%

Immisa qol jiif ayaa ku yaalan gurigaaga?________

Miyaad keensata alwaax/sabuul? ○ Haa ○ Maya

**Gargaarka Tamarta ama Biyaha**

Haddii aad hadda ku jirto xaalad degdeg ah ama aadan bixin karin biilkii lagugu lahaa, sax nooca xaaladda hoose oo soo dir nuqulka ogeysiiska:

☐ Horayba waay go'day. Shirkad:________ Taariikhda Goida:________

☐ Helitaanka ogeysiiskii goynta. Shirkad:________ Taariikhda La Qorsheeyey:________

☐ Ma bixin karo balaski la soo dhaafay. Shirkad:________

☐ Haamaha shidaalka oo maran (ama ka yar 20% oo haanta). Meqaa % ku jira haantaada maanta:________

**La xiriir shirkaddaada tamarta si aad u dejiso qorshe lacag -bixin.**

**Macluumaad dheeri ah**

- Miyaad rabtaa macluumaad ku saabsan sida hagaajinta guriga ee bilaashka ah iyada oo loo marayo Barnaamijka Kaalmada Cimilada oo kaa caawin kara xaaladaha caafimaad sida xiiqda, COPD, xanuunnada kale ee neef -mareenka, cudurrada wadnaha ama xaalado kale oo daba -dheeraada? ○ Haa ○ Maya
- Ma rabtaa inaad isdiiwaangaliso si aad u codeyso ama aad u cusboonaysiiso diiwaangelintaada haddii aad guurtay? ○ Haa ○ Maya
- Haddii aad liis garaysay aaladda moobilka, miyaad rabtaa inaad hesho farriimo qoraal ah oo ku saabsan Barnaamijka Kaalmada Tamarta ama barnaamijyada kale? ○ Haa ○ Maya
- **Sidee baad ku maqashay Barnaamijka Kaalmada Tamarta?** ○ Asxaabta/Qoyska ○ Wargeys ○ Raadiyaha ○ Kireyaha

○ Shaqaalaha Gobolka ○ Xafiiska Halyeeyga ○ Adeegyada Kalkaalinta ○ Websaytka Gobolka ama Degmada ○ Bixiyaha Adeegga/Shidaalka ○ kuwa kale ........................

**Qeybta 5 aad. Oggolaanshaha iyo Saxiixa Oktoobar 1, 2021 illaa Sebtember 30, 2022**

1. Waxaan oggolaanshahayga siiyay shirkadaha kululaynta, korontada, iyo biyaha si ay u baxshaan xog ku saabsan koontadayda iyo tamartayda iyo isticmaalka biyaha ee Waaxda Ganacsiga ee Minnesota (Ganacsiga) iyo qandaraaslayaasha Ganacsiga ee Barnaamijka Kaalmada Tamarta (EAP), Barnaamijka Caawinta Cimilada ( WAP) iyo Barnaamijka Horumarinta Ilaalinta (CIP).
2. Waxaan u oggolaaday Maamulka amniga Bulshada, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota iyo hay'adaha ku xiran, iyo Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota inay wadaagaan xogta ku saabsan Lambarkayga Sooshal Sekuuritiga, faa'iidooyinka dadweynaha ee la helay, iyo dakhliga sannadkii la soo dhaafay u -qalmitaanka faa'iidooyinka oo leh qandaraaslayaasha Ganacsiga iyo Ganacsiga ee EAP, WAP iyo CIP.
3. Waxaan u oggolaaday Minnesota EAP, WAP, iyo CIP inay:
   - La xiriiran cidda aan u shaqeeyo si ay u xaqiijiyaan dakhligayga.
   - La xiriiran kireyaha gurigayga si ay u xaqiijiyaan deganaanshahayga iyo/ama ilaha kululaynta haddii aan ahay kireyste.
4. Waxaan u oggolaaday EAP, WAP iyo Adeeg Bixiyeyaasha CIP inay ila soo xiriiraan si aan uso gaaro oo aan u gudbiyo.
5. Markii aan saxiixayo, waxaan xaqiijinayaa in dhammaan xogta ku jirta arjigan ay sax yihiin. Sidoo kale waan qirahayaa taasi:
   - Hadda waxaan ku noolahay cinwaanka ku qoran arjigan.
   - Waxan u saxiixaya anigoo matalahayo dhamaan xubnaha qoyska.
   - Waxaa laga yaabaa inaan caddeeyo bayaankeyga.
   - Waxaa dhici karta in la ii qabsadomas'uuliyad dambiyeed ama dembi sida uu qabo sharciga federaalka ama gobolka in aan si ulakac ah u sameeyay bayaanno been abuur ah.
   - Waxaan xuquuq ku leeyahay EAP, WAP, iyo CIP. Waxaan helay nuqul ka mid ah "Ogeysiiska Qarsoodinimada iyo Xuquuqahaaga iyo Waajibaadkaaga" waxaanan oggolaaday shuruudaha iyo xaaladaha.
   - Waxaan rafcaan ka qaadan karaa go'aamaha Adeeg Bixiyaha Barnaamijyada Tamarta degaanka ee ku saabsan faa'iidooyinkayga.
   - Waxaan fahansanahay in macluumaadka maqan ay daahin doonaan go'aaminta haddii aan u -qalmo caawimaad.
   - Waxaan fahansanahay in Adeeg -bixiyahaygu uu awoodo inuu iga caawiyo bixinta biilasha tamarta ee la soo dhaafay iyo/ama uu ila sameeyo qorshaha lacag bixinta shirkadahayga tamarta.
   - Waxaan fahansanahay in buuxinta arjigan aysan ii dammaanad qaadaynin in qoyskaygu heli doono caawimaad.
   - Waxaan ahay qaangaar, qaangaar yar oo xor ah, yar ama madaxa qoys oo aan lahayn Dadka Waaweyn ama aan qaangaar ah.

**Magaca Daabacada:**..............................................................................................

**Saxiixa:** ........................................................ **Taariikhda Maanta:**..............................

**Dhammaan arjiyada waa in lagu calaamadeeyaa boostada ama ay heshaa EAP xilliga Maay 31, 2022 ama ka hor.**

**Codsigaaga waa in lagu calaamadeeyaa boostada ama lagu helaa 60 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda aad saxiixday.**

**Xilli hore codso, lacaguhu way dhammaan karaan.**

# Ogeysiiska Qarsoodiga iyo Waajibaadkaaga iyo Xuquuqdaada

## Ogeysiiska Qarsoodiga

**Qodobbada Xeerka Qarsoodiga:** Sharciyada federaaliga ah iyo kuwa gobolku waxay na farayaan in aan kuu sheegno xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga ka hor inta aanan ururinin oo aanan isticmaalin macluumaadka adiga kugu saabsan ee loo asteeyey inay yihiin kuwo khaas ah ama qarsoon. Foomkani wuxuu ku siinayaa macluumaad muhiim ah oo u hoggaansan Xeerka Qarsoodida federaalka ee 1974, 5 U.S.C. § 552a(e)(3) iyo Xeerka Ku Dhaqanka Xogta Dowladda Minnesota, Minn. Stat. .04 13.04, subd. 2 (oo sidoo kale loo yaqaan Digniinta Tennessen).

Fadlan si taxaddar leh u akhri *Ogeysiiska Qarsoodiga* ka hor intaadan dhammaystirin oo aadan saxiixin *Arjiga Barnaamijyada Tamarta ee Minnesota*, oo *ogeysiiskan Qarsoodinimada* ku hayso diiwaannadaada si aad mustaqbalka u isticmaasho. *Ogeysiiskan Qarsoodinimada* wuxuu quseeyaa Barnaamijka Kaalmada Tamarta (EAP), Barnaamijka Kaalmada Cimilada (WAP) iyo Barnaamijka Hagaajinta Ilaalinta (CIP), oo sidoo kale loo yaqaan Barnaamijyada Tamarta.

### Maxaan u aruurinaa macluumaadka ku xusan arjiga?

Waxaan u adeegsan doonnaa macluumaadkaaga inan ku cilmi baarno, ku qiimeyno kuna maamulno Barnaamijyada Tamarta. Waxaan ugu baahanahay macluumaadka:

- si aan ugu ogaano shaqsiyaadka kale.
- Si aan u aragno in aad u -qalanto kaalmo.
- Si aad noogu oggolaato inaan helno miisaaniyada federaalka ama mida gobolka oo loogu talagalay kaalmada aad heshid.
- Si aan u buuxino shuruudaha warbixinta federaalka ama tan gobolka**.**

### Ma tahay inaad na siiso macluumaadka?

Waxaad xaq u leedahay in aadan na siinin macluumaadka aan ku weydiinayno.

### Maxaa dhaci haddii aad na siiso ama aadan na siinin macluumaad?

Haddii aad na siiso macluumaadka arjiga lagu codsaday, arjigaaga waa la shaqeyn doonaa. Haddii aadan na siinin macluumaadkaas:

- Arigaaga lagma shaqeyn doono.
- Ma heli doontid adeegyada.
- Ma heli doontid caawimaadka biilasha tamarta.
- adeegyadaadu dib ayay u dhici karan.

Waanu hayni doonaa wixii macluumaad ah oo aad na siiso, haddii arjigaaga la oggolaado iyo haddii kale ba.

### Yaa arki kara macluumaadkan?

Dadkan soo socda waxay heli karaan macluumaadka ku xusan arjigaaga Barnaamijyada Tamarta haddii: (i) ay u baahan yihiin inay helaan macluumaadka arjiga si ay u qabsadaan shaqooyinkooda la xiriira Barnaamijyada Tamarta (EAP, WAP, iyo CIP), ama (ii) haddii uu u-oggolaaday sharciga federaalka ama ka gobolka si ay u helaan, ama (iii) ay u isticmaalaan macluumaadka warbixinnada, si ay u cabbiraan natiijooyinka, iyo u -diritaanka iyo ujeeddooyinka u -qalmitaanka:

- Adeeg Bixiyeyaasha Barnaamijyada Tamarta Deegaanka oo qandaraas kula jira Waaxda Ganacsiga ee Minnesota (Ganacsiga).
- Adeegyada Bulshada ee Bixiya Deeqda blok-yada iyo Bixiyeyaasha Adeegga Deeqda Waxqabadka Bulshada ee Minnesota oo qandaraas kula jira Ganacsiga.
- Hanti dhawrayasha barnaamijka ee loo baahanyahay ama laga oggol yahay Xafiiska Maamulka iyo hagista Miisaaniyadda (OMB).
- Waaxaha Maamulka, Ganacsiga, Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota, Caafimaadka, Wakaaladda Maaliyadda Guryaha, Adeegyada Aadanaha, Dakhliga iyo Adeegyada MN.IT.
- Waaxaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha iyo Tamarta ee Maraykanka.
- Guddiga Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota.
- Hantidhawraha Sharci -dejinta Minnesota.
- Dadka sidaas loo idmaday iyadoo la raacayo amarka maxkamadda.
- Shirkadahaaga tamarta ee la awoodi karo iyo Barnaamijyada Tamarta.
- Iskaashiga Waxqabadka Bulshada Minnesota.
- Maamulka Amniga Bulshada ee Mareykanka.
- Hay'adaha kale ama madaxbanaanida sida uu oggol yahay sharciga federaalka ama kan gobolka.

### Maxaan u soo uruurinaa Lambarada amniga bulshada?

Waxaan u isticmaalnaa Lambarada Amniga Bulshada maamulka Barnaamijyada Tamarta (EAP, WAP, iyo CIP) si aan u hubino codsadayaasha iyo xubnaha qoyskooda u qalma inay helaan faa'iidooyinka la oggol yahay oo keliya. Sharciga federaalku wuxuu noo oggolaanayaa inaan kaa doonno inaad sheegto Lambarkaaga amniga bulshada si loo socodsiiyo arjigaaga oo looga hortago, in la ogaado oo loona saxo khayaanada iyo xadgudubka. XUKUNKA: Qeybta 205(c)(2)(C)(i) ee Xeerka amniga Bulshada, 42 U.S.C. § 405(c)(2)(C)(i). Dhammaan codsadayaasha (marka laga reebo dadka aan muwaadininta ahayn ee u qalma) waxa looga baahan yahay inay keenan Lambarka amniga bulshada oo la xaqiijin karo si loo socodsiiyo arjigaaga.

### Maxaan u weydiinnaa macluumaad ku saabsan isirkaaga?

Tani waa macluumaad ikhtiyaari ah. Waxaa loo soo uruuriyaa oo loo diiwaangeliyey ujeedooyin tirakoob oo keliya. Barnaamijku cidna kuma takoori karo sababo jinsiyadda ama asalka qowmiyadda, diinta, jinsiga, nooca galmada, ama ku xirnaanta siyaasadda ah.

# Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga

**<u>Waxaad leedahay xuquuq gaar ah si aad cawimaad u heshid</u>**:

Waxad xaq u leedahay:

- inaad mar kale soo codsato haddii laguu diiday.
- Inaad codsato si aad u hesho caawimaad dheeri ah haddii aad u baahan tahay.
- Si aad u ogaato xeerarku waxa ay yihiin iyo sida aan u go'aansanno caawimaadda aad hesho.
- Si aad jawaab ugu hesho waqti macquul ah marka aad gudbiso dhammaan macluumaadka.
- Si aad racfaan ugaga qaadato 30 maalmood gudahood kadib marka laguu soo diro natiijooyinka codsigaaga haddii:
  - Aad heshid warqad diidmo ah oo aad u malayso inaan isticmaalnay macluumaad khaldan si aan u gaarno go'aanka.
  - Aadan helin caawimadii laguu ballanqaaday.

**<u>Waxaad leedahay mas'uuliyadahaas:</u>**

Waa inaad noo sheegtaa haddii adiga ama qof ka tirsan qoyskaaga:

- kaalmo ku helay biilashada tamarta horaantii jiilaalka.
- U guuray cinwaan cusub (noo sheeg 30 maalmood gudahood guuritaankaas).
- Uu Beddellay iibiyahaaga shidaalka ama gaaska ama shirkadaha korontada.

**Barnaamijkan waxa laga yaabaa inuu bixiyo qayb ka mid ah biilasha kuleliylinta iyo korontada. Adiga ayaa ka mas'uul ah inaad bixiso inta soo hartay.**

**<u>Ka warran haddii aad u malaynayso in macluumaadka ku jira faylkaaga uu khalad yahay?</u>**

Kala hadal Adeeg Bixiyahaga maxalliga ee EAP waxa aad u malaynayso inuu ka qaldan yahay faylkaaga.

**<u>Maxaa dhacaya haddii aad bixiso macluumaad been ah?</u>**

Adeegga Bixiyeyaasha EAP ee degaanka ama Waaxda Ganacsiga ee Minnesota ayaa hubin kara oo xaqiijin kara mid kasta oo ka mid ah macluumaadka ku xusan arjigaaga ama si kale laguu baxshay. Waxaa laguu diidi karaa fa'aidooyinka Barnaamijka Tamarta haddii aad keento macluumaad aan dhammaystirnayn ama been ah. Waxaa laguu qabsan xadgudub bulsheed ama dembiyeed oo waafaqsan shuruucda gobolka ama kuwa federaalka oo kugu eedaynaya inaad adigoo ka warqaba codsigaaga ku sheegtay macluumaad been abuur ah.

**<u>Sida loo gudbiyo cabashada:</u>**

Haddii aad u malaynayso in lacag bixinta tamartaadu aanay ahayn waxay ahaan laheyd ama aadan helin adeegyadii aad u malaynaysay inaad heli doonto, waxaad la xiriiri kartaa Adeeg Bixiyaha degaankaaga EAP ee ku qoran arjiga. Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabtooda, waxaad warqad racfaan ah u qori kartaa Adeeg Bixiyaha EAP ee degaankaaga. Hayso diiwaanka cinwaankooda iyo lambarka taleefankooda.

Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabtooda ku saabsan racfaankaaga, waraaq u qor:

Sarkaalka Rafcaanka
Barnaamijka Kaalmada Tamarta
Waaxda Ganacsiga ee Minnesota
85 East 7th Place, Suite 280
St. Paul, MN 55101-2198

Haddii aad dareento in lagugula dhaqmay si ka qaldan sababna ay utahay midabkaaga, isirkaaga, asalka waddankaaga, diintaada, jinsigaaga, jinsigaaga, da'daada, xaaladdaada guurka, aaminsanaanta siyaasadda, ama naafada jirka, maskaxda ama dareenka, waraaq u qor mid ka mid ah kuwan soo socda:

Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee
Grigg's Midway Building
540 Fairview Ave. N, Suite 201
St. Paul, MN 55104
https://mn.gov/mdhr/

-ama-

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha
Xafiiska Xuquuqda Rayidka, Region V
233 North Michigan Avenue, Suite 1300
Chicago, IL 60601
www.hhs.gov/ocr/civilrights/complaints